



Hawsha Waaxda Dabdamiska ee Seattle

Hawsheenu waa inaan ka hortagnaa in nolol ama hanti ay ku khasaarto oo uu dabka natiija u yahay, Wuxaan hawsheena qabanaa iyadoo la isticmaalaya dadka dabdamiska oo aad loo tababaray, xoog saarida ka hortagga dabka iyo tacliintiisa iyo xirfadda caafimaadka degdeggaa oo wadanka si fiican looga yaqaan.

Howlaha Waaxda Dabdamiska ee Seattle

- Dabdamiskaiyo howlaha caafimaadka degdeggaa, khafiifinta masiibada iyo qalabka qatarta, iyo wax qabadyada badbaadinta.
- Kormeerridda meelaha ganacsiga, guryaha la degoo iyo xarumaha biyaha hortooda.
- Hawlaha bulshada, taasoo ka mid ah baaritaanka dhiig karka, booqashada saldhigiyada dabka iyo qalabka, iyo bandhigga nabadgelyada nolosha iyo dabka bulshada gudaheeda
- Hawlaha nabadgelyda, sida. Soo saaridda rukhsadaha waxqabadka qatarta, waxay baaraan sababaha dabka, waxay sameeyaan baaritaan si loo hubiyo in dhismaha cusub ay ka badbaadayaan dabka, soona saaraya sharci loo yaqaan Xeerka Dabka ee Seattle kaasoo asaasaya heerarka nabadgelyada dabka ee Seattle gudaheeda
- Sharciyada ka hortagga dabka iyo caawinaada isku diyaarinta, sida. ilaha sameynnta qorshaha degdeggaa ah, ee loogu talagalay shaqaalaha lagu tababaraayo habka nabadgelyada dabka iyo caawinaada carruurta si ay wax uga bartaan nabadgelyada dabka waxaa lagu heli karaa bilaash.

Xiriirka

- Sidaad u soo sheegtid dab ama wixii kaloo degdeg ah ama qof aad taqaanid uu u baahan yahay caawinaad caafimaadeed, wac 9-1-1.
- Xarunta Waaxda Dabdamiska Seattle waxay ku taal 301 2nd Avenue South, Seattle gudaheeda, waxayna u furan tahay dadka oo dhan laga bilaabo 8:00 subaxnimoil ilaa 4:30 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Taleefoonka Waaxda oo aan degdegtahay waa 206-386-1400